Taageeridda Xoojinta **Qorshaynta Isbeddelka Cimilada** Ee Mashruuca Soomooliya

# Aqoonta Guud Ee Isbeddelka Cimilada Iyo Fahamka Saamaynta Isbeddelka Cimiladu Ku Yeeshay Bulshada Soomaaliyeed

## Understanding General Knowledge on Climate change



Wasaradda Deegaanka iyo Isbedellada Cimilada
Ministry of Environment and Climate Change
وزارة البيئة والتغير المناخي

UNDP

GREEN CLIMATE FUND

KAALO
Aid and Development Org

JAAMACADDA CAMUUD
AMOUD UNIVERSITY

PUNTLAND STATE UNIVERSITY

SIMAD UNIVERSITY

## Hordhac

Isbeddelka Cimilada ilaa qanigii 20-aad waxa si waadax ah oo aan mugdi ku jirin lagu gaartaa kororka heerkulka ku dhacaya hawada iyo badaha adduunka. Sidaa oo kale, waxa lagu garan ogyahay meelaha qabowga badan oo barafkii dhulka ku dahaarnaa dhalaalayo, iyo isbeddelka jawiga iyo qulqulka badaha ku dhacaya. Sida oo kale, waxa laga fahmayaa qaababka cimilada ee saamaynta ku leh xilli roobaadka iyo in uu roobku da'o. Isbeddelladan dhacaya waxa sabab u ah kulaylka baahsan ee dunida oo dhan ka jira oo ay ugu wacan tahay wasakhaynta ama diiqowga loo geysanayo hawada iyo sitaaca samada.

Isbeddelka Cimilada waxa uu si toos ah qayb weyn uga qaata qaar kamid ah waxyaabaha ay dadku sameeyaan, sida: wershadaynta, gubashada shidaalka (dhuxul-dhagaxa, saliidda, iyo gaaska dabiiciga ah), xaalufka dhulka, beeraha, iyo deegaamaynta dhulka. Kororka xaddiga gaaska ka dhasha waxyaabaha ay dadku sameeyaan ayaa waxyeello weyn u geysta lakabyada xijaabka sare ee hawada, dabadeedna waxa kordha heer kulka, isbedelka cimiladuna xawli ayuu ku socdaa.

## Waa Maxay Isbeddelka Cimiladu?

Cimilo waxa loola jeedaa celceliska heer-kulka, qoyaanka, xilli-rooobaadyada, qaababaka roobabka, oo muddo dheer oo sannado ah xogtooda la ururinayey, halka ereyga (weather) hawo/jawi uu tilmaamayo ururin xog muddo gaaban – maalinle, todobaadle, bille, iyo sannadle lagu sameeyey xaaladaha jawgiga dhul gaar ah.  joqoraafı ahaan.

Isbeddelada ku dhacay xaaladaha jawiga sannadka oo dhan waa isku mid, waxa ayna u taagan yihiin xilliyo gaar ah oo la yaqaan oo khaas u ah joquraafi ahaan aag gaar ah. Halka, Jawigu isu bed-beddelo si soo noqnoqosha ah oo lagu saadaalin karo muddooyin gaagaaban oo waqtiyeysan. Cimilda isbeddello xoog leh oo muuqda kuma yimaadaan muddo gaaban, ilaa la arko khalkhal galay nidaamyadii dabiiciga ahaa oo wax aan la arkijirinna ay dhacaan.

Isbeddelka Cimiladu waa kaladuwanaanshaha la arki karo ee muhiimka ah marka la eego celceliska xaaladaha jawiga iyo soo noqnoqodkooda. Waxa tusaale aynnu u soo qaadan karnaa kulka, sayaxa, ama qallaylka la arko in ka badan tobonnaan sano ama ka badan oo ay sababeen falalka waxyaabaha ay aadanuhu samaynayaan. Sidaas darteed, isbeddelka Cimiladu waa xogo la ururiyey oo ku salaysan muddo gaaban, muddo dhexe, iyo muddo dheer.

Isbeddellada cimilada uu sababay bini'aadmku waxa laga sooci karaa isbeddellada dabiiciga ah ee muddadda dheer. Soomaaliya, isbeddelka cimilada waxa lagu gaartaa isbeddelka ku yimid cimilo-xilliyeedka, iyada oo ay kordheyso in la sii saadaalin waayo  soo noqnoqshada dhacdooyinka taban ee dalka joogtada ka noqday, sida: daadadka, tatahaadaha, abaaraha, sunaamiyada, duufaannada ka dhaca kulaalayaashaha (tropics) (storms) iyo duufaannada kale, sida: (cyclones).

**1. Maxay yihiin Waxyaabaha Dhaliya Isbeddelka Cimiladu (Gudo & Dibadba)?**
Kuwa Dibadda ee Dhaliya Isbeddelka Cimilada (Interntional):: Dhaqdhaqaaqa bini'aadmka ayaa ilaa qarnigii 19-aad diiriyey ama kululeeyey in ka badan 1c. Saamaynta waxyeellaynta cimiladuna waxa ay noqotay mid aan la filayn. Kuwan gaarka ah ee soo socda ayaa kamid ah:

**(i)** Heerarka dabiiciga ee hawada oo lagu sii daayey qiiqa kaarboon-laba-ogsaydka, kaas oo ka dhasha marka la gubo curiyayaasha soo socda: dhuxusha, saliidda, iyo gaaska dabiiciga ah; **(ii)** Gaaska methane oo dheeraad ah, nitrous oxide oo ka dhasha xoojinta hawlaha beer-aha iyo beddelaadda lagu sameeyo isticmaalka dhulka; **(iii),** iyo dhowr gaas oo ka dhasha wershadaha, kuwaas oo aan si caadi ah isaga iman.

**2. Xaalufinta Dhirta:**
Dhirtu waxa ay door ka qaadataa maaraynta kaarboonka, sidaas darteed ayaa dhulka oo dhirta laga xaalufiyaa ay waxyeelo ku tahay maaraynta kaarboonka.

**3. Tignoolajiyada:**
Adeegsiga noocyada kaladuwan ee tignoolajiyada cusub sida: baabuurta, aaladaha kale, qaboojiyayaasha, tallaajadaha, bacrimiyayaasha kiimikada ah iyo kuwa la hal maal ee loo isticmaalo beeraha ayaa kordhiya qiiqa GHGs.

**4. Wershadaha & Shidaalka Loo Adeegsado:**
Shidaalka iyo warshadaha (dharka, birta, shamiitada/sibidhka, kiimikada, warshadaha cun-tada i.w.m.) waxa ay hawada ku sii daayaan xaddi badan oo ah GHGs.

Kuwa Gudaha ah ee dhaliya Isbeddelka Cimilada (Local):



Dhuxuleynta Dhirta

Natiijada ka dhalatay  abaaraha soo noqnoqday, dagaallada sokeeye, iyo nolol xumada jirta ayaa kordhisay in bulshooyinka xoola dhaqatada ah ee dalka Soomaaliya ay gubidda dhuxusha ka dhigtaan ilo dhaqaale iyo qaab kale oo ay noloshooda ku maareeyaan. Dhuxul shidada Soomaaliya waa dhibaato weyn iyo xaalufin lagu hayo deegaanka, waxa ayna qayb ka qaataan colaadaha iyo khilaafaadka bulshada ka dhex oogma.

**5. Jaridda Kaymaha**

Geeduhu/dhirtu waxa ay door ka ciyaaraan habaynta cimilada iyaga oo jawiga ka soo nuuga CO2.  Marka dhirta la gooyo waxa lumaya waxtarkaas faa'iidada badan, waxana dhacaya in kaarboonkii geedaha ku keydsanaa ay hawada u baxaan ama lagu sii daayo, iyaga oo ku biiraya waxyeellada cimilada iyo jawiga.  Intaas waxa dheer, in har la'aan darteed uu kul imanayo. Jarista dhirtu waxa ay keentaa kor-u-kaca heer kulka deegaanka. Heerkulka dusha sare ee deegaanka waxa ka dhasha uumi bax  aad u badan oo ku dhaca biyaha, taas oo horseedda qallayl iyo hoos-u-dhac ku yimaada dhulkii deegaanka.
Waxa kale oo dhacaysa in dhul daaqsimeedku baab'ao iyo in dhulku lama deegaan isu beddelo. Taasi waxa ay keentaa in deegaanka la xaalufiyey abaartu ku badato oo roob la'aani ku dhacdo.

Ugu dambayn, daboolka dhirtu ay dhulka ku daboolan tahay ayaa si weyn uga qaybqaata kororka uumiga iyo wareegga biyaha ee biosphere, taas oo ah in biyuhu isu beddelaan uumi oo kor u baxaan daruurana noqdaan, kadibna roob soo da'o. Goynta dhirtu waxa ay keentaa hoos-u-dhac ku yimaadda daboolka dhirta, taas oo dhulka baabi'inaysa, markaas ayaa khakhal iyo dhalanrog ku yimaaddaa wareegga biyaha  oo loola jeedo uumiga kor-u-baxa ka dibna daruur noqda, ka dibna roob. Taas ayaa horseedaysa carrada oo qallasha, nabaad-guur, iyo ugu dambayn saamayn xun oo ay ku yeelato awoodda haynta biyaha. Macnuhu waa ciidda oo aan biyaha hayn karayn. Waxa kale oo meesha ka baxaya awoodda iyo waxtarka ay ciiddu u lahayd  nolosha.


Jaridda Dhirta



Dhaqashada Xoolaha

**Kordhinta Dhaqashada Xoolaha:** Lo'da iyo ariga waxa ay soo saaraaan xaddi badan oo ah gaaska loo yaqaan Methane marka ay dheefshiidaan cuntada oo saaloodaan.




Maarayn xumada Qashinka ee Kismaayo

Bacriminta ay ku jirto nitrogen, waxa ay soo saartaa Nitrous Oxide.



Kafaa'iideysiga bacriminta Nitrous ee beeraha ganacsiga (Isha: Puntland MoECC).

## Saamaynta Isbeddelka Cimilada iyo Bulshada Soomaaliyeed.

Saamaynta ay isbeddelka Cimiladu ku yeelatay Soomaaliya waa mid si wayn u muuqata. Isbedelka Cimilada ee Soomaaliya waxa dabeecad u noqday in ay korodhay soonoqnoqashada dhacdooyiinka ba'an ee ku dhaca jawiga/hawada, sida: abaaraha isdabajoogga ah, daadadka iyo fatahaadaha joogtada ah oo waxyeello ba'an u geysta wax-soosaarkii beeraha, xoolo bandanna ay ku le'daan, taas oo meel ba'an gaarsiisey cunto yaraanta, sababtayna in Soomaalidu ay mudato, maganna u noqoto gurmad iyo xaalad bini'aadanimo oo degdeg ah.

**1. Saamaynta Isbedelka cimilada ee habka nolosha iyo degaanka**

Gubidda dhirta waxa ay dhaawc iyo wax yeelo ku tahay noolaha kala duwan ee ku nool dhirta. Waa arin aad ugu xoog badan dalka Soomaaliya. Taas oo sababta in gaasas kala duwan oo fara badani ay ka dhashaan.

Khayraadka Badda & Xeebaha:

- Kororka ciidda iyo bacaadka oo daboola dhulka xeebta ah.
- Saaruqda iyo dhirta kale ee kalluunku cuno oo yaraada.
- Biyaha dhulka ku hoos jira ee xeebta oo dhanaan noqda, waxana ugu wacan biyaha milixda ah oo soo gala.
- Waxa burbura goomaha kalluunku daaqo oo dabaylaha ka dugsado; sababta oo ah, kor-u-kaca ku yimaadda heerkulka biyaha badda iyo ciidda xeebta.

Kaladuwanaanshaha Noolaha ***(kaymaha, biyaha macaan, badda, iyo noocyo qalaad oo meela kale ka yimaadda)***

- Xaalufinta deegaanka iyo jaridda dhirta oo dhuxul laga shido.
- Ugaarsiga duurjoogta oo kordhay
- Carro guur ka dhashay xaalufinta dhirta.
- Gubashada duurka.
- Duurjoogta oo qaxda oo deegaanka ka guurta.
- Noocyada xawayaanka iyo dhirta oo yaraana.
- Waxa heer-kulka oo sareeya awgeed badanaya tirada qaar ka mid ah noocyada noolaha sida: cayayaanka, dhir loo baahnayn iyo cudurro sidayaasha.

**2. Saamaynta Siyaasadda Bulshada & Dhaqaalaha:**

Badashada soonoqnoqashada abaarta, fatahaadaha, iyo daadadka joogtada ah ee waxyeellada gaarsiiyey wax soosaarkii beeraha, xoolo badanna lagu waayey, iyo cunto la'aanta Soomaalida ku habsatay.

Xasaradaha ka dhashay cimiladu waxa ay khatar ku yihiin horumarka dhaqan-dhaqaale ee Soomaaliya, iyaga oo kordhinaya biyo yaraanta iyo cunto yaraanta, baahida gaarka ah ee

cunto yarida khusaysa, baahida loo qabo gurmad iyo gargaar degdeg ah, barakaca, xaalufka iyo burburka hab-nololeedyadii soojireenka ahaa. Xaalufka ba'an ee lagu hayo dhulka ayaa saamayn xun ku yeelanaya in bulshooyinka xoola dhaqatada ahi ay xoolaha u helaan daaq, arrintaas oo sababta in ay dagaallo dhexmaraan bulshooyinka xoola dhaqatada ah iyo beer-leyda; iyaga oo ku dirira daaqa, marka xooluhu galaan beerta oo oo ay cunaan.



**Cunta Yaraanta:**
Isbeddelka ku yimaadda cimilada awgeed, waxa waxyeelladu saamaynaysaa beeraha. Tan waxa sabab u ah isbeddellada roobabka. Abaaraha iyo daadadka oo si isdabajooga ah u dhacaya ayaa waxyeello u geystay hawlaha beeraha iyo wax-soosaarkoodii, taasaana dadka ugu wacan cunto yaraanta.



**Barakac:**
30-kii sano ee ugu dambeeyey, Soomaaliya waxa soo foodsaartay macaluul, abaaro, iyo daadad aad u soo batay. Macaluushii Soomaaliya ka dhacday 1992, waxa ku dhintay ku dhowaad 300,000 oo qof, waxana ku barakacay malaayiin qof!



**Hoos-u-dhac Dhul-daaqsimaadka:**
dhibaatooyinka ka dhashay isbedelka cimilada waxa ka mid ah wax soo saarkii dhul daaqsimeedka oo yaraaday, waana tan hadda haysata Soomaaliya



**Daadad:**
Roobab aad u xoog badan ayaa waxyeello gaarsiiya inta badan dhulka dowlad-goboleedyada Soomaaliya ilaa 20-kii, April, 2020, meelaha dhibaaatooyinka ba'ani gaareen waxa kamid ah Koonfur Galbeed, Jubbaland, Banaadir, iyo Puntland, waxana roobabku sababeen daadad, fatahaad ay webiyadu karkaarrada jebiyeen iyaga oo waxyeello u geystey kaabayaashii, jidadkii, skuulladii, iyo guryihii.



**Duufaan:**

Soomaaliya waxa si isdabajoog ah u soo maray duufaanno, gaar ahaan xeebaha. Duufaannadu waxa ay si wadar ah ama qaar ah u baabi'iyeen waxyaabihii ay noloshu ku tiirsanayd ee xoola dhaqashadii, kaluumaysigii, ganacsigii iyo kaabayaashii dhaqaalaha.



**Colaado:**

Diirrimaadka iyo kulaylka ku dhacay meeraha dhulka iyo natiijada ka dhalatay ee isbeddellada ku dhacaya deegaankii dabiiciga ahaa, waxa uu bini'aadamka ku keenay khataro fara badan. Waxa kordhay halganka iyo tartanka loogu jiro khayraadka, sida: dhulka ku wanaagsan beerashada iyo ilaha biyaha.

## Baahiyaha Gargaarka Bini'aadanimo

Isbeddelada ku dhacaya cimilada iyo waxyaabaha kaladuwan ee dhacaya ee kordhaya ayaa loo fahmayaa in ay yihiin waxyaabaha ugu weyn ee sababaya colaadaha ka dhaca Soomaaliya iyo kutartanka khayraadka oo khilaafaadkuba ku salaysan yahay. Tartankaas iyo halganka loogu jiro khayraadka ayaa sabab u ah kalaqaybsanaanta beelaha iyo dagaallada jifi-hoosaadyada beesha gudaheeda. Isbeddelka cimilada ayaa qasay hab-nololeedkii miyiga, taasina waxa ay qayb ka qaadatay in ay tuulooyin samaysmaan, iyada oo dad badani ay ku khasbanaadaan in ay hab-nololeedkoodii beddelaan. Raritaannada ama guuritaanada dadka ayaa kamid ah khataraha ugu badan ee ka jira Soomaaliya, kuwaas oo sabab u ah in ay abuurmaan dhibaatooyina bini'aadannimo.

## Farriimaha Muhiimka ah ee Laqabsiga Isbeddelka Cimilada Soomaaliya:

Isbeddelka Cimilada Soomaaliya iyo geeska Afrika waxa uu sababayaa kororka soo dhacdooyinka ba'an ee cimilada , iyaga oo keenaya abaaro xoog leh oo isdabajooga ah iyo in haddana daadaad aan la malayn  karin si dhaqso ah ay u bilowdaan. Tani waxa ay waxyeello u leedahay hab-nololeedkii xoola dhaqatada iyo beeralayda. Waxa ka dhasha cunto la'aan iyo nafaqa darro, waxana sii xumaada xaaladaha nololeed ee Soomaaliya.

Waxa ugu daran oo arrintani ay si xun u saamaysaa dadka danyarta ah iyo kuwa la hayb sooco, islamarkaasna waxa ay sii hurisaa xasaradaha iyo in ay kordhaan halganka loogu tartamayo  khayraadka gabaabsiga ah.  Tani waxa  ay sii xumaysa khilaafka iyo colaadaha ka dhex oogma bulshada nugalka ah ee  dayacan. Sidaas darteed, waxa jira baahiyo loo qabo in bulshooyinka iyo daneeyayaasha kale ay sameeyaan dadaallo wadajir ah, oo laga dhigayo kuwo u qabsooma heer qaran, heer gobol, heer bulsho, iyo heer qosys; si loola qabsado isbeddellada cimilada.

## Farriimaha Muhiimka ee Ku wajahan  Dejiyayaasha Siyaasadda:

**Qiimaynta khatarta isbeddelka Cimilada {(Climate Change Risk Assessment, (CCRA)}:**

Qiimaynta khatarta isbeddelka cimiladu waa aalad muhiim ah oo kor u qaadaysa fahamka waxa qayb walba hawsha kaga soo aadaysa, sida: heer qaran, heer urur, iyo heer bulsho ee la xiriirta wax-ka-qabashada khatarta isbeddelka cimilada.

Qiimayntu waxa ay waxtar u tahay in ay dadku tijaabiyaan xeeladahooda la xiriira maaraynta khatarta isbeddelka cimilada, isla markaasna ay ogaadaan meelaha xeeladaha cusub looga baahan yahay.

Qiimaynta khatarta waa qayb iskudhaf ah oo kamid ah hawlaha lagu dejinayo qarshaha nidaamka laqabsiga isbeddelka cimilada ee hoos lagu muujiyey.

## Talaabooyinka Muhimka ah ee CCRA Waa:

**Tallaabada 1aad:** Dejeinta macnaha guud (baaxadda qiimaynta khatarta).
**Talaabada 2aad:** Fahamka khatarta jirta ee cimilada
**Talaabada 3aad:** Fahamka khatarta iyo fursadaha wax looga qaban karo khatarta isbeddelka cimilada mustaqbalka; iyo
**Tallaabada 4aad:** Falanqaynta iyo qiimaynta khatarta.
Cabbirka, Warbixinta & Xaqiijinta {Measurement, Reporting and Verification (MRV)}; Isbedelka Cimilada Soomaaliya: Hadda Soomaaliya ma laha nidaam faah-faahsan oo lagu cabbiro isbeddelka cimilada, warbixinta iyo xaqiijinta.  Dalku waxa uu hadda ku guda jiraa samaynta

qalab lagula socdo sida loola qabsanayo isbeddelka cimilada. Warbixinta xaaladda ee labada sano ee hore waxa daba socda soojeedin ku saabsan in la sameeyo nidaamka Cibbirka, Warbixinta iyo Xaqiijinta isbedelka cimilada (MRV). Soojeedinta oo ku salaysan mareegaha midaynaya laqabsiga cimilada, yaraynta khatarta, iyo taageerada ayaa caawimi doonta hawlaha la xiriira dabagalka, falanqaynta, iyo tayaynta in Soomaaliya ay ka gudubto heer dhaqaale oo ku tiirsan kaarboonka iyo jidka laqabsiga cimilada oo fududaada.

Nidaamka la xiriira Cabbirka, Warbixinta, iyo xaqiijinta (MRV) ayaa muhiim u ah Soomaaliya, si ay u buuxiso ballanqaadkeedii caalamiga ahaa ee ladagaallanka isbeddelka cimilada; sababta oo ah, nidaamkani waxa uu bixiyaa xogo iyo macluumaad la xiriira meelaha ay ka imanayaan waxyaabaha sababaya isbeddellada cimilada, isaga oo fududeeya in lala socdo oo la raadraaco bar-tilmaameedyada isbeddelka cimilada. Waxa uu nidaamkani jiheeyaa talaabooyinka lagu yaraynayo dhibaatooyinka isbeddelka cimilada. Waxa uu toosiyaa tallaabooyinka lagu gaarayo bartilmaameedka. Waxa laga helaa sida loo raadraacayo tallaabooyinka laqabsiga iyo taakulada loo baahan yahay in la sameeyo, ayna kamid yihiin: maalgelin, kor-u-qaadidda tayada iyo teknoolajiyada. Nidaamka Cabbirka, Warbixinta, iyo Xaqiijinta MRV (Measurement, Reporting and Verification) waa qaybo muhiim u ah hubinta, hufnaanta, daahfurnaanta, tayda, iyo isbarbardhigga xogaha isbeddelka cimilada ee soo baxaya.

## Xoojinta dhinacyada isku-dubaridka isbeddelka cimilada Soomaaliya:

Waxa loo baahan yahay in la hagaajiyo (maamulka deegaanka iyo isku-dubaridka) Soomaaliya, iyada oo la eegayo guud ahaan kor-u-qaadidda wax-kaqabashada isbeddelka cimilada ee dalka. Daldaloollada ka jira qaab-hawleedka haya'deed ayaa aad loo diiwaan geliyey. Waxa ay ku soo baxeen warbixinno qiimayn ah oo uu kamid yahay qorshaha waxqabad ee la xiriira kaladuwanaanshaha noolaha.

Soomaaliya waxa ku kulmay caqabado badan oo la xiriira maamulka deegaanka iyo isuduwidda hawlaha, waxana ragaadiyey xasilooni darro siyaasadeed oo dalka ka jirta, liidashada haayadaha dawladda iyo khayraadka xaddidan. Caqabadahani waxa ay dhaawac ku yihiin isku-dubaridka howsha iyo dadka ay khusayso ee la rabo in ay ka qayb qaataan fulinta hawlaha sida meel marinta xeeraka degaanka ee ku lugta leh ilaalinta degaanka iyo dhammaan waxqabadyada lagu maaraynayo faya qabka degaanka

Awood la'aanta iyo isku-dubarid la'aanta ka dhexeysa waaxyaha kaladuwan ee dawladda iyo hay'adaha ayaa uga sii daraya xaaladda maamulka deegaanka dalka.

## Xoojinta Guddiga Qaran ee Isbeddelka Cimilada {National Climate Change Committee (NCCC)}: (GQIC).

Waa guddi ka kooban daneeyayaal u xil saaran isku-dubaridka siyaasad heerkeedu sarreeyo oo dhinacyo badan leh. Guddigani waxa uu masuul ka yahay korjoogtaynta dhammaan

fulinta hawlaha la xiriira wax-kaqabashada isbeddelka cimilada dalka Soomaaliya. Waxa uu ka kooban yahay ra'iisal wasaaraha ama qof uu beddelkiisa u magacaabay, agaasimaha guud ee deegaanka iyo isbeddelka cimilada, waaxyaha wasaaradaha, agaasimayaasha hay'adaha dawladda, wasiirada deegaanka ee dawladaha xubnaha ka ah Federaalka iyo ururrada bulshada rayidka ah.

## Xogta Isbeddelka Cimilada & Hawada/Jawiga:

Waxa jirta baahi loo qabao in Soomaaliya ay maalgeliso aaladaha lagu helo macluumaadka la xiriira isbeddelka cimilada qaranka; si loo helo xog dhab ah oo khaas u ah isbeddelka cimilada. Sida oo kale, Soomaaliya waxa ay u baahanaan doontaa in ay horumariso awoodeedda  waxdhalinta iyo faafinta macluumaadka cimilada; si loo qorsheeyo nidaamaka hore-u-tebinta digniino wax tar leh.
Hor-u-tebinta digniin dhab ah iyo in tallaabo ku habboon la qaado ayaa ah kuwo aad loogu kalsoonaan karo marka la hayo xog la isticmaalo, barax tiran oo cusub; si loo saadaaliyo cimilada mustaqbalka iyo xaaladaha hawada ama jawiga.

**Ilaalinta Deegaanka:** Ilaalinta deegaanka Soomaaliya waxa uu saamayn toos ah ku yeelan doonaa deegaamaynta iyo in maxalli laga dhigo hawlaha laqabsiga iyo yaraynta saamaanta isbeddelka cimilada. Daneeyayaasha Soomaalidu waa in ay maalgashadaan abaabulka gudaha ee ay wadaan bulshooyinku, iyada oo kor loo qaadayo wacyigelinta,  aqoonta, iyo helidda macluumaadka/xogta deegaanka.
Tani waxa kale oo ay u baahan tahay heer qaran – Federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah, iyo weliba xil-qaadayaasha kale in ay sameeyaan siyaasad  iyo xeerar wax-ku-ool ah oo ku saabsan dib-u-soo noolaynta deegaanka iyo maaraynta wasakhowga  badda.

## Fariimaha Muhimka ee Ku Socda Bulshada Soomaaliyeed:

Garashada iyo xoojinta tallaabooyinka ay bulshadu ugu adkaysanayso isbeddelka cimilada: iyada oo kor loo qaadayo hab-nololeedyo waara, oo maareerya kaladuwanaanshaha noolaha, lana dhiso awoodaha waxtarka u ah hab-nololeed waara.

**Hirgelinta Daraasadaha Tijaabada:** Mashaariic loogu talagalay wax-qabashada isbeddelka cimilada oo laga hirgeliyo gobollada kaladuwan ee dalka, kuwaas oo u nugul waxyeellada ka dhalata isbeddelka cimilada, aadna loo fahmo isku-xirnaanta bedqabka-cimilada iyo waxyaabaha caddaymaha ah ee ku soo kordhaya dabeecadaha dhulka.

In la taageero iskudhafka xeerka dhaqanka  ee maaraynta dhulka iyo guud ahaan nidaamka maamulka deegaanka. Wax-kaqabshada shaqo la'aanta dhallinyarada iyo in la siiyo fursado shaqo; si loo yareeyo colaadaha, barakaca, iyo tahriibta. Wax-kaqabashada biyo yaraanta oo ah mid kamid ah sababaha ugu waaweyn ee colaadaha bulshooyinku ay ka dhashaan.



Taageeridda Xoojinta **Qorshaynta Isbeddelka Cimilada** Ee Mashruuca Soomooliya

# Aqoonta Guud Ee Isbeddelka Cimilada Iyo Fahamka Saamaynta Isbeddelka Cimiladu Ku Yeeshay Bulshada Soomaaliyeed

Understanding General Knowledge on Climate change